

**Todobaadlaha BSD - June 14, 2021**

**Hambalyo Qalinjabyayaasha AVID!**

AVID waa fasal la ka jira dhammaan dugsiyada dhexe, sare iyo kuwa ikhtiyaariga ah ee Dugsiga Degmada Beaverton. Fasalku wuxuu ardayda ka caawiyaa inay horumariyaan xirfadaha ay u baahan doonaan si ay ugu guuleystaan kuleejka iyo wixii ka dambeeya. Hambalyo [AMA21NG Seniors of AVID](#).

**Iska jir dib udhaca xagaaga**

Carruur badan ayaa illooba qaar ka mid ah wixii ay soo barten bilaha xagaaga. “Dib u dhaca xagaaga” waa hoos u dhac ku yimaada awooda akhriska iyo xirfadaha kale ee tacliimeed ee dhici kara marka iskuulka uusan furneyn. BSD waxay diyaarisay [Digital Summer Resources webpage](#) si loogu siiyo ardayda ilaha waxbarashada dijitaalka xagaaga oo dhan. Inta ka fiiri!


**Ardayda Terra Nova waxay Quudiyaan Bulshada**

Intii lagu gudajiray Cudurka faafa ee COVID-19, ardayda iyo howlwadeenada Iskuulka Terra Nova School of Science and Sustainability waxay beereen cunno badan waxayna siinayeen dadka si ay uga caawiyaan quudinta bulshada. Eeg sababta ardaydu u jeclaadeen inay gacmahooda wasakhoobaan! <https://youtu.be/wVvAHoWd8IM>

**Waad Ku Mahadsantahay Qaadashada Daraasada Waalidka ee 2021**

Waad ku mahadsan tihiin in aad ka mid noqotaan in ka badan 5,700 jawaabood oo ku saabsan Sahanka Waalidka ee 2021; tani waa koror ka badan 40% marka loo eego 2019. Waad ku mahadsantahay waqtiga aad siisay inaad la wadaagto ra'yigaaga!

Daraasaddan sannadkan, 76% waalidiinta ayaa soo sheegay inay ku kalsoon yihiin awooddooda ay ku taageerayaan barashada ilmahooda ee guriga. Waan ognahay in sanad dugsiyeedkaan looga baahan yahay waalidiinta taageero dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada ardayga ee guriga, waana ku faraxsanahay taageerada aad siisay cunugaaga. Waxaan rajeynaynaa inaan sii wadno la-hawlgalkaaga sannadka dambe marka ay ardaydu jidh ahaan iskuulka joogi doonaan maalin walba.



Natijoooyinka heer degmo ee sahaminta ah ayaa lagu diri doonaa barta internetka [Research & Reports webpage](#) xagaaga, hogaamiyaasha iskuulkuna waxay heli doonaan natijoooyin iyo faallooyin heer dugsi ah

### **Hayso Xagaag Xasilooni leh oo Nasasho leh!**

Xusuusin ahaan, tani waa caddadkii ugu dambeeyay ee BSD Toddobaadle ah sanad dugsiyeedka 2020-2021. Maaddaama degmadu qorsheyneyso inay si ammaan ah u soo dhaweyso ardayda iyo shaqaalaha iskuulka deyrta, waxaa laga yaabaa in loo baahdo in loo diro isgaarsiinta degmada oo dhan xagaaga oo dhan. Waxaan ku soo diri doonnaa isgaarsiinta barnaamijkeenna cusub ee isgaarsiinta, [ParentSquare](#). Waxaan sidoo kale ku dhejin doonnaa macluumaad muhiim ah degelkeena degellada iyo barnaamijyada warbaahinta bulshada. Fadlan hubi emaylkaaga si joogto ah xagaaga oo dhan si aad ula socoto.

Warsidaha todobaadlaha ah ee BSD wuxuu dib u bilaabmi doonaa Isniinta, Ogast 2.

### **ParentSquare Facebook Wadahadal.**

Dugsiga Degmada Beaverton wuxuu bilaabi doonaa barnaamij isgaarsiineed cusub oo lagu magacaabo ParentSquare bisha Juun 28 si loogu badali doono SchoolMessenger. Waxaan kugu dhiiri galinaynaa inaad daawato tan [3-minute video](#).

Haddii aad su'aalo qabtid, fadlan nagala soo qaybgal chat Facebook. Waxaan diyaar u nahay inaan ka jawaabno su'aalaha Talaadada, Juun 29 laga bilaabo 6:00 ilaa 7:00 pm. Fadlan ogow, tani ma noqon doonto dhacdo fiidiyoow toos ah laakiin waa wadahadal waqtiga-dhabta ah iyada oo loo marayo faallooyin.

Si aad wax badan uga ogaato ParentSquare, booqo bartayada [ParentSquare webpage](#).